Shuruucda ku saabsan ka hortaga isqaadsiinta Koronaha, ee dagmada Fredrikstad, ee gobolka Viken

Taariikhda	17.12.2020
La dhaqan galiyay	18.12.2020 kl. 00.00
Markii ugu danbaysay ee la badalay	
La badalay	
Waxa ay kkusaysaa	Dagmada Fredrikstad, ee gobolka Viken
Saldhig sharciyeed	LOV-1994-08-05-55-§4-1
Lagu dhawaaqay	
Joornaalka nr.	
Cinwaan gaaban	Shuruucda ku saabsan ka hortaga isqaadsiinta Koronha, degmada Fredrikstad

Saldhig sharciyeedka: Waxaa gaadhay maamulka golaha magaaladada ee degmada Fredrikstad 17. diisembar 2020 ee saldhig sharciyeedka la gaadhay 5.agosto 1994 nr. 55-aad ee ku saabsan ilaalinta ka hortaga isqaadsiinta xanuunada § 4-1. kaas oo uu badalay maamulka sare ee degmada kiiska 160/20

§ 1. *Ujeedooyinka iyo aag hawlgalka*

Ujeedada sharciyada ayaa ah in la sameeyo talaabooyin lagu xakameynayo infekshinka maxalliga ah si looga hortago ama loo xaddido faafida cudurka Koroonaha (SARS-CoV-2) iyadoo la yareynayo tirada dadka xiriirka dhow la leh ee bulshada, sidaasna looga hortagayo cudurrada loona hubinayo dayactirka awoodda ku filan caafimaadka iyo adeegga daryeelka.

Xeerarku waxay khuseeyaan degmada Fredrikstad.

§ 2. *Faashada afka*

Marka aysan suurta gal ahayn in ugu yaraan hal (1) mitir laga fogaado ee aan ahayn xubnaha kale ee qoyskaaga, marka lagu daro is agmarka muddada-gaaban, faashadaha afka waxa loo isticmaali doonaa meelaha dadweynaha, oo ay ku jiraan dukaamada, suuqyada laga adeegto, makhaayadaha, guryaha diinta iyo goobaha dhaqanka, isboortiga. iyo howlaha firaaqada.

Marka aysan suurta gal ahayn in ugu yaraan hal (1) mitir laga fogaado dadka aad isla safraysaan ee gaadiidka dadwaynaha waa in aad isticmaashaa faashada afka. Tani waxay sidoo kale khuseysaa gudaha aagagga astaanka basaska.

Rakaabka tagaasida waa inay xidhaan faashada afka. Faashada afka waa in la xidho ka hor inta aanu rakaabku tagsiga soo fadhiisan, waana inaan faashada afka laga furin ilaa safarku dhammaado oo rakaabku ka baxo/dago taksiga. Waajibaadka xirashada faashada afku waxa ay kale oo ay khusaysaa darawalka marka ay rakaabku ku jiraan taksiga.

Waajibaadka xidhashada faashada afka ma khusayso carruurta ka yar da'da dugsiga dhexe, gaadiidka dugsiga ee dugsiga hoose, ama dadka aan caafimaad ama sababo kale u xidhan karin faashada afka.

Waajibaadka xidhashada faashada afka sadarka koowaad wuxuu khuseeyaa shaqaalaha ka shaqeeya meelaha aanay suurtagal ka ahayn in ugu yaraan hal mitir laga fogaado dadka ka adeeganya goobahaas, marka la tixraaco sharciga. sadarka koowaad.

Tani ma khusayso shaqaalaha meelaha talaabooyinka kale ee xakamaynta infekshinka loo fuliyay/sameeyay shaqaalaha, sida adeegsiga (visir)= oo ah balaastiga wajiga lagu daboolo, samaynta darbi galaas ah iyo wixii la mid ah. iyadoo la raacayo talooyinka Machadka Qaranka ee Caafimaadka Bulshada.

Timajarayaasha iyo shirkadaha la midka ah, ee lagu maamulo xeerarka qaranka ee covid-19-ka § 15, waxay u hoggaansamaan/raacayaan shuruudaha qaranka.

§ 3. Dhacdooyinka dadweynaha ee banaanka iyo gudahaba

Qeexitaanka dhacdooyinka ee xeerarka 27 Maarso 2020 lambar 470 ee tallaabooyinka xakamaynta cudurka marka la tixraaco. marka laga hadlayo Koroonaha dillaacay (ee lagu dabaqaayo xeerka loo yaqaan 'covid-19) § ee xeerka 13 ayaa lagu dabaqayaa.

Lama ogola in munaasabadaha lagu qabto banaanka iyada oo in ka badan 200 oo qof ay wada joogaan isla waqtigaas.

Dhacdooyinka gudaha ee dawliga ah, waa la xaddidayaa tirada dadka waxaana la tixraacayaa xeerka qaranka.

Heesaha iyo wixii lamid ah, waa inuu jiraa kala fogaansho laba (2) mitir ah oo udhaxeeya dadka aan wada nooleyn.

Qabanqaabiyaha waa inuu hubiyaa in dhammaan kaqeybgalayaasha aan isku guriga aheyn ama iskuulka ama xanaanada caruurta ay awoodi doonaan inay ugu yaraan hal (1) mitir masaafo ah ka dheeraadaan dadka kale oo aan isku reer / koox wadaag aheyn, oo laga qiyaaso kala dheeraanshaha garab ka garab. Tani waxay sidoo kale khuseysaa albaabka laga galayo ama laga baxayo, iyo sidoo kale xilliyada nasashada.

Dadyawga ku fadhiya kuraasta ku dhajisan dhulka waa in qabanqaabiyayaasha munaasabadu ay u dhaxaysiiyaan hal fadhi labadii kursiba ee saf kasta inta ayna imaanin munaasabada. Dadka isku guriga ah way is ag fadhiisan karaan markay yimaadaan ka dib. Dadku ma fadhiisan karaan in ka badan kala badh kuraasta go'an, illaa qof kastaa ka dheer yahay ugu yaraan hal (1) mitir masaafo dhan ee dadka kale ee qoys kale ah.

§ 4. Dhacdooyinka gaarka loo sameeyo iyo kulamada bulshada

Tirada martida ee kulannada bulshada ee gaarka ah ee lagu sameeyo guryaha dhexdooda, banaanka guriga ama (hytte) guryaha dibada, iyo dhacdooyinka gaarka ah ee ka dhaca meelaha xafiisyada dawliga ah iyo hoolalka la kireysto, waxay noqon doonaan ugu badnaan shan (5), qof marka lagu daro qoyskaaga.

Ka-reebitaannada ayaa la samayn karaa illaa laba taariikhood inta lagu jiro muddada xeer-dejinta, halkaas oo illaa toban (10) qof oo martida ah ay kulmi karaan, marka lagu daro qoyskooga.

Degane kasta waa inuu ku xaddido tirada kulannada ay ka qaybgalayaan laba (2) asbuucii, ha ahaadaan martiye ama martigaliye.

Waa inuu had iyo jeer jiraa ugu yaraan hal (1) mitir masaafada udhaxeysa cid kasta oo aan isku meel ku nooleyn.

Marka laga reebo xeerka qaran ee guud waxa wadajir isula joogi kara kooxaha aasaasiga ah sida xanaanada caruurta iyo caruurta dugsiga hoose ayay khusaysaa, si carruurta ka tirsan isla koox ay iyaguna isku meel ku kulmi karaan waqtigooda firaaqada. Carruurta ka tirsan dhowr qoys waxaa loo tixgeliyaa inay ka mid yihiin labada qoysba. Dhallinyarada iyo ardayda ku nool guryaha ardayda, laakiin ku diiwaangashan guryahooda, ayaa sidoo kale loo xisaabiyaa inay ka mid yihiin qoyska.

Abaabulaha gaarka ah/marti sooruhu waa inuu:

a. U diyaarin sidii loo falgalin lahaa talooyinka xakamaynta infekshinka iyo sidii loo ilaalin lahaa.

b. In la helo aragti guud oo ku saabsan qof kasta oo goobjoog ah, taariikhda, waqtiga, magaca iyo lambarka taleefanka, si aad u awooddo inaad gacan ka geysato ogaanshaha cudur kasta ee soo socda.

§ 5. Hawlaha wakhtiga firaaqada, isboortiga aasaasiga ah iyo deeqaha jimicisiga

Dadka waaweyn iyo dhalinyarada ka weyn da'da dugsiga dhexe, nashaadaad habeysan oo abaabulan ama isboorti aasaasi ah lama sameyn/qaban doono.

Mamnuuciddu ma khusayso dhaqdhaqaaqyada bannaanka ee loogu talagalay dhalinyarada illaa 20 sano ah.

Mamnuucida sidoo kale ma khusayso tababarka shakhsiyeedka / cayaaraha halka ugu yaraan laba (2) mitir oo masaafo la kala dheeraan karo kaqeybgalayaasha kale ee aan isku qoys aheyn, oo laga qiyaas qaato garab ilaa garab, si aan xidhiidh dhow loo abuurin.

Xarumaha jimicsiga iyo dhismaha kale ee lagu qabsado waxqabadyada la midka ah ayaa loo furi karaa tababar shaqsiyeed. Waa in la hubiyaa inaysan dad badan joogin qolka taas oo aan la kala dheeraan karininta laba mitir. Tababbarka koox ee leh saddex ama in ka badan ay ka qayb qaadanayaan lama oggola. Tirada la oggol yahay ee martida ee qolka waa in lagu xisaabiyaa iyadoo loo eegayo cabbirka qolka. Waa inuu jiraa shaqaale jooga oo hubiya in la ilaaliyay shuruudihii oo la waafajiyay xeerarka.

§ 6. Xaddidaadda tirada inta ka adeegan karta dukaamada iyo suuqyada laga adeegto

Dukaammada, suuqyada wax laga iibsado iyo meelaha kale ee wax lagu iibiyo waa inay hubiyaan inaysan dad badani isku mar joogin goobta oo aan la raaci karin xeerarka kala dheeraanshaha ugu yaraan hal mitir. Tirada macaamiisha la oggol yahay ee ku dhex jiri kara dhismaha waxaa lagu xisaabin doonaa iyadoo lagu saleynayo cabbirka dhismaha. Waa in boordh cadaynaya la saaraa albaabka laga soo galayo tirada ugu badan ee macaamiisha loo oggol yahay in ay soo galaan markiiba. Haddii loo baahdo, waxaa jiri kara in la helo qof ilaaliye ah oo hubiya in shuruudii la waafajiyay

§ 7. *Makhaayadaha - iyo kilaabyada/baararka khamrada*

Makhaayadaha Cunnada iyo baararka ku yaal degmada Fredrikstad way sii furnaan karaan haddii ay buuxiyaan shuruudaha hawlgal habboon ee makhaayadaha marka la tixraaco xeerarka 27 Maarso 2020 lambar 470. ee ku saabsan hawlqabadka xakamaynta ilaalinta Koroonaha ka dilaacay ee (qaynuunka covid-19 xeerarkiisa). Makhaayada waxaa laga yaabaa, iyadoo la raacayo qawaaniinta qaranka, in ay makhaayadu u adeegi karto munaasabado khaas ah oo gaadhaya ilaa 20 qof.

Makhaayadahaas iyo baararka ku yaal degmada Fredrikstad ee fursad u leh inay furnaadaan iyadoo la raacayo xeerarka qaran ee covid- 19-ka, waa mamnuuc in khamri lagu iibiyo wixii kadanbeeya. Sa. 22.00.

Degmadu way xidhi kartaa makhaayadahaas iyo baararka aan u hoggaansamin shuruudaha hawlgalka xakameynta-ilaalinta infekshinka iyo shuruudaha ku jira qodobkaan, cf. Sharciga Xakamaynta Cudurka § 4-1 sadarka saddexaad iyo jumlada shanaad.

§ 8. *Karantiilka iyo raad dabagalka isqaadsiinta xanuunka*

Deganayaasha iyo dadka soo booqanaya magaalda Fredrikstad waa inay u hogaansamaan xeerarka karantiilka ee shaqeynaya waqti kasta, ayna gacan ka geystaan ogaanshaha cudurka.

§ 9. Mas'uuliyad

Degmada Fredrikstad wax masuuliyad dhaqaale ah iskama saarayso talaabooyinka lagu soo rogay awgeed.

§ 10. *Dhaqan galitaan iyo mudada uu socon doono.*

Xeerku wuxuu dhaqan galayaa 18 Diseembar 2020 saacada 00.00, waana uu shaqynayaa/ ansaxayaa illaa iyo 7. Janaayo 2021.